



Federal Republic of Somalia
Federal Parliament
The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS
Si waafaqsan Qod.39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 7aad	Kulanka: 12aad
Taariikhda: 15 Disembar, 2025	Goobta Fadhiga: Xarunta Aqalka Sare
Saacadda uu Furmay: 11:36 AM	Saacadda uu Xirmay: 12:06 PM
Shir Guddoonka Fadhiga: Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi	Guntanka Kulanka: 33 Sanator
Martida Kulanka: Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka XFS, Mudane Xasan Macalim Maxamuud.	Ajendayaasha Kulanka: 1. Akhrinta Aayadaha Qur`aanka. 2. Ansixinta Ajandaha. 3. Warbixinta Wax-ka-baddelka Hindise Sharciyeedka Hay`adda xisaabiyaasha Soomaaliyeed. 4. Akhrinta Seddixaad ee Hindise-Sharciyeedka Caddaalada Da`yarta Soomaaliyeed

Furitaanka Kulanka:

Senator Saciid Cabdi Xuseen ayaa akhriyey Aayadaha Qur'aanka ee kulanka lagu furay

Ansixinta Ajandayaasha Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa xubnaha kulanka

fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajandayaasha kulanka, codaynta ayaana u dhacday sidan:

Oggol: 32 Senator

Ka aamusay: Majirin

Diidmo: Majirin

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa u yeeray Guddoomiye ku-xigeenka Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda, Ganacsiga, Warshadaha, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska Senator Ibraahim Aw-gaab Cismaan, si uu Golaha uga hor akhriyo warbixin ku saabsan Wax-ka-baddelka Hindise-sharciyeedka Hay'adda Xisaabiyaasha Soomaaliyeed. Warbixinta kaddib, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa cod geliyey Ansixinta warbixinta ku saabsan Wax-ka-baddelka Hindise-sharciyeedka Hay'adda Xisaabiyaasha Soomaaliyeed, waxayna u dhacday sidan:

Oggol: 29 Senator

Ka aamusay: 2 Senator

Diidmo: Majirin

Intaas kaddib, Guddoomiyaha ayaa u yeeray Xubin ka mid ah Guddiga Garsoorka, Arrimaha Diinta iyo Awqaafa, Xuquuqul Insaanka, Haweenka iyo Carruurta, Senator Saciid Cabdi Xuseen, si uu Golaha uga hor akhriyo warbixin ku saabsan Akhrinta Saddexaad ee Hindise-sharciyeedka Caddaaladda Da'yarta Soomaaliyeed. Warbixinta kaddib, Guddoomiyaha Golaha Aqalka ayaa cod geliyey Ansixinta Hindise-sharciyeedka Caddaaladda Da'yarta Soomaaliyeed, waxayna u dhacday sidan:

Oggol: 30 Senator

Ka aamusay: Majirin

Diidmo: 2 Senator

Ansixinta kaddib, Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arimaha Dastuurka XFS ayaa senatarada uga mahadceliyey ansixinta Hindise sharciyeedka.

Go'aamada Kulanka:

1. Ansixinta Ajandayaasha kulanka.
2. Ansixinta Warbixinta Wax-ka-baddelka Hindise Sharciyeedka Hay'adda xisaabiyaasha Soomaaliyeed.
3. Ansixinta Hindise-Sharciyeedka Caddaalada Da'yarta Soomaaliyeed.

Ugu dambayntii, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullaahi ayaa kulanka soo xiray saacadu markay ahayd **12:06 PM**.

DHAMAAD.